Xaqa ahayda) iyo Caddaynta Wax kasta iyo Hanuunka iyo Naxariista Ciddi Rumayn Xaqa.

ٱلَّذِى بَيْنَ يَدَيْهِ وَتَفْصِيلَ كُلِّ شَىْءٍ
وَهُدًى وَرَحْمَةً لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿١١١﴾

**Eebe wuxuu diray Nabi Maxamed hortiisa (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Rasuullo loo waxyooday, ee Dadku waa inay Dhulka maraan ee Waano Qaataan siday noqotay Cidhibtii Kuwii hore Aakhiraana u Khayrroon Kuwa Dhawrsada, Tan kale markay Rasuuladii ka Quusteen rumaynta Qoomkoodii oo la Beeniyay yaa Waxaa u imaanayay Gargaarkii Eebe Markaasuu Korinaayey Cidda uu doono, Wax Ciqaabta Eebe kuwa danbiillayaasha ah ka Celina ma Jiro, Qisooyinkaa la soo Sheegayna waanaa ugu Sugan Cidii Caqli leh, Mana aha War la iska been abuuray, Waase urumayn xaqii ka Horreeyay, iyo Caddaynta Wax Kasta iyo hanuunka iyo Naxariista ciddii Rumayn Xaqa.**
**Saasayna ku Dhamaatay Suuraddii iyadoo kulmisay Wax badan oo Qisadii Nabi Yusuuf iyo Xigmooyin kalaba, waxaase waajiba in Lagu Waano Qaato siday Suuraduba ku Dhamaatay, Lana rumeeyo Xaqa, Eebana loo kali yeelo Cibaadada, lana Sugo Gargaarka Eebe, Lana ogaado Xaqnimada Quraanka, Wanaaga iyo Xaqana loogu Yeedho Dadka, Guud ahaan Eebe si Dhaba loo Rumeeyo Yuusuf (109-111).**

## Suurat Ar-Racd — سورة الرعد

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Xarfaha hore oo kale waan soo Sheegnay Fasirkooda, Kuwaasna waa Aayaadkii Kitaabka (Quraanka), Waxaa lagaaga soo Dejiyay xagga Eebahaa waana Xaq Dadka Badankiise ma Rumaynin.

الٓمٓرۚ تِلْكَ ءَايَٰتُ ٱلْكِتَٰبِۗ وَٱلَّذِىٓ أُنزِلَ إِلَيْكَ
مِن رَّبِّكَ ٱلْحَقُّ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿١﴾

2. Eebe waa kan koryeela Samooyinka Tiir La‘aan aad Aragtaan Markaas ku istiwooday Carshiga, Sakhirayna Qorraxda iyo Dayaxa Dhammaana waxay ku socdaan Muddo magacaaban, Eebaa maamula amarka Caddeeyana aayaadka Inaad la kulanka Eebihiin yaqiinsataan.

ٱللَّهُ ٱلَّذِى رَفَعَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ بِغَيْرِ عَمَدٍ تَرَوْنَهَاۖ ثُمَّ ٱسْتَوَىٰ
عَلَى ٱلْعَرْشِۖ وَسَخَّرَ ٱلشَّمْسَ وَٱلْقَمَرَۖ كُلٌّ يَجْرِى لِأَجَلٍ
مُّسَمًّىۚ يُدَبِّرُ ٱلْأَمْرَ يُفَصِّلُ ٱلْءَايَٰتِ لَعَلَّكُم بِلِقَآءِ
رَبِّكُمْ تُوقِنُونَ ﴿٢﴾

3. Eebe waa kan Fidiyay Dhulka Yeelayna Dhexdiisa buuro, iyo wabiyo Midho kastana ka yeelay Dhexdiisa

وَهُوَ ٱلَّذِى مَدَّ ٱلْأَرْضَ وَجَعَلَ فِيهَا رَوَٰسِىَ وَأَنْهَٰرًاۖ
وَمِن كُلِّ ٱلثَّمَرَٰتِ جَعَلَ فِيهَا زَوْجَيْنِ ٱثْنَيْنِۖ يُغْشِى ٱلَّيْلَ

ٱلنَّهَارَۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَٰتٖ لِّقَوۡمٖ يَتَفَكَّرُونَ ﴿٣﴾

laba nooc Wuxuuna ku Dadaa Habeenkii Maalinta, Arrintaasna Calaamooyin yaa ugu Sugan Ciddii fikiri.

Suuradaha lagu Billaabay Xarfahaạs oo kale waxay ku tusin Sida Eebe Quraanka Ugu gargaaray iyo xaqa iyo Waynida Quraanka, Aayadahanna waxay ku Tusin in Quraanku xaq Eebe soo Dejiyay yahay, inkastoo Dadka badankii Rumaynin, Ilaaha Quraanka soo Dejiyayna waa kan koryeelay Samooyinka tiir La‘aantiis.
Kuna istiwooday carshiga si u cunanta hallayn la‘aan iyo u ekaynsiin la‘aan Sahlayna Qorraxda iyo Dayaxa,muddo ay ku socdaana uyeelay,Amarkana isagaa Maamula, Caddeeyana Aayaadka inaad la kulanka Ilaahiina rumaysaan, waana Kan Dhulka fidiyay,buuro, wabiyo, iyo Nooc kastoo midha ahna yeelay, Habeenka iyo Maalintana isku badala si ay Calaamo ugu Noqoto ciddii Fikiri.
Taasina waxay ku Tusin in Eebe Maamulo Adduunka sare iyo Hoosaba, Awooddiisuna wax la Qiyaasi karo Ahayn,Mudanna cibaado Dhaba iyo Aqoonsi. Ar-Racd (1-3).

---

وَفِي ٱلۡأَرۡضِ قِطَعٞ مُّتَجَٰوِرَٰتٞ وَجَنَّٰتٞ مِّنۡ أَعۡنَٰبٖ
وَزَرۡعٞ وَنَخِيلٞ صِنۡوَانٞ وَغَيۡرُ صِنۡوَانٖ يُسۡقَىٰ بِمَآءٖ
وَٰحِدٖ وَنُفَضِّلُ بَعۡضَهَا عَلَىٰ بَعۡضٖ فِي ٱلۡأُكُلِۚ
إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَٰتٖ لِّقَوۡمٖ يَعۡقِلُونَ ﴿٤﴾

4. Dhulka waxaa ah Goosinno daris ah (isku dhaw) iyo Bustaan Cinaba iyo Beer iyo Timir oo Mataano ah iyo kuwo aan Mataano ahayn, laguna Waraabiyo Biyo kaliya Waxaana ku kala Fadilaynaa (Wanaajinaynaa) qaar qaarka kale Cunnada (Dhadhanka) Arrintaasna Calaamaa ugu Sugan Ciddii Wax kasi.

۞ وَإِن تَعۡجَبۡ فَعَجَبٞ قَوۡلُهُمۡ أَءِذَا كُنَّا تُرَٰبًا
أَءِنَّا لَفِي خَلۡقٖ جَدِيدٍۗ أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ
بِرَبِّهِمۡۖ وَأُوْلَٰٓئِكَ ٱلۡأَغۡلَٰلُ فِيٓ أَعۡنَاقِهِمۡۖ وَأُوْلَٰٓئِكَ
أَصۡحَٰبُ ٱلنَّارِۖ هُمۡ فِيهَا خَٰلِدُونَ ﴿٥﴾

5. Haddaad yaabtana waxaa Yaaba Hadalkoodii Ahaa ma Markaan noqonno Carro yaa Markaas Abuur Cusub (Nala abuuri) Kuwaasi waa kuwa Ka Galoobay Eebahood waana Kuwa Luquntooda la Yeelay Katiinado waana kuwo Naarta Ehelkeeda ah Kuna Dhex waari.

وَيَسۡتَعۡجِلُونَكَ بِٱلسَّيِّئَةِ قَبۡلَ ٱلۡحَسَنَةِ
وَقَدۡ خَلَتۡ مِن قَبۡلِهِمُ ٱلۡمَثُلَٰتُۗ وَإِنَّ رَبَّكَ
لَذُو مَغۡفِرَةٖ لِّلنَّاسِ عَلَىٰ ظُلۡمِهِمۡۖ
وَإِنَّ رَبَّكَ لَشَدِيدُ ٱلۡعِقَابِ ﴿٦﴾

6. Waxayna kaa Dedejisan Xumaan wanaag ka hor Iyadooy Tagtay Hortood tusaalayaal (ciqaabeed) Eebahaana waa u danbi Dhaafaha dadka iyagoo Dulmi ku sugan Eebahaana waa Ciqaab darane.

Aayaduhuna waxay ka warrami Qudrada Eebe iyo Awooddiisa iyo Midhaha isu Dhaw ee Biyo kaliya ka waraaba Hadana kala Duwanyahay Dhadhankoodu, Midabkoodu, adaygga, Jileeca,waynida, yaraanta, Waxaasoo Dhanna waxay ku tusin Awoodda iyo Maamulka Eebe ay Kuwaano Qaadan Ciddii wax kasi, Yaan ilaahay ahayn oo saas Yeeli kara, Away kuwii Caqli xumaa ee lahaa Dabeecadbaa wax Fasha, waa layaab Waxaase la yaab isna ah inay Gaaladu Cuslaystaan in Markay Dhintaan oy Carro Noqdaan La soo celin markale, Kuwaasu waa kuwa Eebe Ka gaaloobay ee luqunta Laga xidhi waana Kuwo ku waari, ee dadajista Ciqaab iyo Dhibaato Wanaag ka hor, Hortoodana waxaa ahaa wax lagu waano qaato oo Ciqaaba, Eebase wuu isaga Danbi Dhaafaa iyagoo Dulmi fali, Ciqaabtiisuna way darantahay. Rasuulkana (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Saamaxa Eebe la‘aantii iyo Dhaafiddiisu cidna Nolol Kuma xasisheen,Ciqaabtiisuna hadayna Jirin cid Kasta Way Talo saaran lahayd. Waxaa wariyay Ibnu abii Xaatim, Saas Darteed waa in La waano qaato Wanaaggana lagu dadaalo,Xaaraantana laga fagaado. Ar-Racd (4-6).

7. waxay dheheen kuwii gaaloobay maxaa loogu soo Dejin waayey korkiisa Aayad xagga Eebihiis ka timid, adugu waxaad uun tahay Dige cid kastana waxay leedahay Hanuuniye.

وَيَقُولُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ لَوْلَآ أُنزِلَ عَلَيْهِ ءَايَةٌ
مِّن رَّبِّهِۦٓ ۗ إِنَّمَآ أَنتَ مُنذِرٌ ۖ وَلِكُلِّ قَوْمٍ هَادٍ ﴿٧﴾

8. Eebaa og waxay ku siddo uurka Dhaddig kasta, iyo waxay Ilmo galleennadu Nusqaamin, iyo waxay kordhin (Dhicis iyo Shin) wax kastana Eebe agtiisa Qaddar (Waqti) yuu leeyahay.

ٱللَّهُ يَعْلَمُ مَا تَحْمِلُ كُلُّ أُنثَىٰ وَمَا تَغِيضُ
ٱلْأَرْحَامُ وَمَا تَزْدَادُ ۖ وَكُلُّ شَىْءٍ
عِندَهُۥ بِمِقْدَارٍ ﴿٨﴾

9. wuxuuna ogyahay wax maqan iyo waxa jooga waana weyne ka sarreeya (wax kasta).

عَٰلِمُ ٱلْغَيْبِ وَٱلشَّهَٰدَةِ ٱلْكَبِيرُ ٱلْمُتَعَالِ ﴿٩﴾

10. waana isku mid kiinna qarsada hadalka iyo kiinna la qaylya, iyo kii isqariya habeenkii iyo kii Muujiya Maalintii.

سَوَآءٌ مِّنكُم مَّنْ أَسَرَّ ٱلْقَوْلَ وَمَن جَهَرَ بِهِۦ
وَمَنْ هُوَ مُسْتَخْفٍۭ بِٱلَّيْلِ وَسَارِبٌۢ بِٱلنَّهَارِ ﴿١٠﴾

11. wuxuuna leeyahay (Ruux kasta) kuwo ku isbedela (Malaa‘ig) oo hortiisa iyo Gadaashiisa ah kuna dhawra amarka Eebe, Ilaahayna ma dooriyo wax dad ku suganyahay intay ka dooriyaan waxa naftooda ku sugan, markuu Eebe la doono Dad dhibna wax ka celin ma jiro,mana laha Eebe ka sokow Gargaare.

لَهُۥ مُعَقِّبَٰتٌ مِّنۢ بَيْنِ يَدَيْهِ وَمِنْ خَلْفِهِۦ يَحْفَظُونَهُۥ
مِنْ أَمْرِ ٱللَّهِ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُغَيِّرُ مَا بِقَوْمٍ حَتَّىٰ يُغَيِّرُوا۟
مَا بِأَنفُسِهِمْ ۗ وَإِذَآ أَرَادَ ٱللَّهُ بِقَوْمٍ سُوٓءًا فَلَا مَرَدَّ لَهُۥ ۚ
وَمَا لَهُم مِّن دُونِهِۦ مِن وَالٍ ﴿١١﴾

Waxbadan yey Gaaladii warsadeen Aayado Kibir iyo isla wayni darteed, Nabiguse waa uun u Dige’cidkastana waxay leedahay Hanuuniye.
Tan kale Eebaa wax walba og, waxa Uurka ku jira, waxa dhicis noqon waxa Shin ku dhalan, wax walbana Waqti bay ku leeyihiin Eebe agtiisa, wuuna ogyahay waxa maqan iyo waxa jooga, waana waynaha sarreeya, waana isugu mid Eebe ciddii wax qarsata iyo tii Muujisa iyo tii Habeen la gabata iyo tii Maalin Muujisata, ruux walbana Malaa’igbaa hortiisa iyo Gadaashiisa ku dhawrta Idinka Eebe, Sunnada Eebana waa inaan cidna laga doorinin siday ku sugantahay haddayna doorinin waxa Naftoodu kusugan cidduu Eebe xumaan la doonana wax ka celin ama gargaari ma jiro.
Waxaana sugnaaday in Malaa’igtu isukeen Beddesho Habeen iyo Maalin, saasayna u habboontahay in xumaanta laga dhawrsado wanaagana lagu dadaalo, Eebana la cuskado. Ar-Racd (7-11).

---

12. Eebe waa kan idin tusiya Hillaaca cabsi gelin iyo rajo gelin darteed, wuxuuna abuuraa daruurta culus.

هُوَ ٱلَّذِى يُرِيكُمُ ٱلْبَرْقَ خَوْفًا وَطَمَعًا
وَيُنشِئُ ٱلسَّحَابَ ٱلثِّقَالَ ﴿١٢﴾

13. wuxuuna la tasbiixsadaa onkadku Mahadda Eebe ku dheehan iyo Malaa’igtuna (waxay la tasbiixsan)

وَيُسَبِّحُ ٱلرَّعْدُ بِحَمْدِهِۦ وَٱلْمَلَٰٓئِكَةُ مِنْ خِيفَتِهِۦ

Cabsida Eebe, wuxuuna diraa Danabyo wuxuuna ku ridaa cidduu doono, iyaguna waxay ku murmi Eebe isagoo ciqaabtiisu darantahay.

وَيُرْسِلُ ٱلصَّوَٰعِقَ فَيُصِيبُ بِهَا مَن يَشَآءُ
وَهُمْ يُجَٰدِلُونَ فِى ٱللَّهِ وَهُوَ شَدِيدُ ٱلْمِحَالِ ﴿١٣﴾

14. Eebe waxaa u Sugnaaday Baryo (iyo Cibaado) Xaqa, waxa ka soo hadhayna waxba uma ajiibaan (kuwa baryi) sida mid ku fidiyey Gacmihiisa Xagga Biyaha inay Afkiisa gaadhaan, mana gaadhayaan, Baryada Gaaladuna waxaan baadi ahayn ma aha.

لَهُۥ دَعْوَةُ ٱلْحَقِّ ۖ وَٱلَّذِينَ يَدْعُونَ مِن دُونِهِۦ لَا يَسْتَجِيبُونَ
لَهُم بِشَىْءٍ إِلَّا كَبَٰسِطِ كَفَّيْهِ إِلَى ٱلْمَآءِ لِيَبْلُغَ فَاهُ
وَمَا هُوَ بِبَٰلِغِهِۦ ۚ وَمَا دُعَآءُ ٱلْكَٰفِرِينَ إِلَّا فِى ضَلَٰلٍ ﴿١٤﴾

15. waxaa Ilaahay u Sujuuda «u khuduuca» waxa ku sugan Samooyinka iyo Dhulka Ogolaansho iyo Qasab iyo Hooskooda aroor iyo Galbihiiba.

وَلِلَّهِ يَسْجُدُ مَن فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ طَوْعًا
وَكَرْهًا وَظِلَٰلُهُم بِٱلْغُدُوِّ وَٱلْءَاصَالِ ۩ ﴿١٥﴾

**Eebe waa kan awoodda badan ee Dadka tusiya Hillaac Cabsi gelin iyo Damac galin, Abuurana daruur culus, lana tasbiixsado Onkadku iyo Malaa'igtu dartiis, dirana danabyada cidduu doonana ku rida, Gaaladuna waxay ku murmi Eebe isagoo Ciqaabtiisu darantahay, Eebana wuxuu mudan yahay Cibaado Xaq ah isagaana baryo mudan, waxay baryi Eebe ka sokowna waxay la mid yihiin ruux Gacmaha Biyaha ku taagay inay soo gaadhaan Afkiisa mana suurowdo, Gaalada baryadeeduna waa Baadi wax kama jiraana, waxa Cirka iyo Dhulka ku suganna Eebay u Khuduucaan Ogolaansho iyo Qasabba oo cid Abuurid, Doorsoon, Cudur, Geeri iyo Maamulka Eebe diidi karta ma jirto.**
**Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Haddaad Maqashaan onkodka Eebe Xusa, kuma dhoco cid Eebe xusiye, waxaa wariyey Dhabaraani. Dhabtuna waa in Eebe Xaq yahay, Nabiguna Xaq yahay, Diintuna Xaq tahay, Qiyaamo iyo Xisaab iyo Janno iyo Naarna wax sugan yihiin lana rabo Darbasho iyo samo fal. Ar-Racd (12-15).**

---

16. waxaad dhahdaa yaa ah Eebaha Samooyinka iyo Dhulka, waxaadna dhahdaa waa Eebe, waxaadna dhahdaa ma yeelanaysaan Eebe ka sokow Awliyo (gargaarayaal) oon u hananayn naftooda Nacfi iyo dhib midna, dheh ma egyihiin Indhoole iyo wax Arke, mase egyihiin Mugdiyo iyo Nuur mise waxay u yeeleen Eebe Shuruko wax u Abuuray sida Abuurka Eebe oo waxaa isaga ekaaday Abuurkii, waxaad dhahdaa Eebaa wax kasta Abuuray waana kali awood badan.

قُلْ مَن رَّبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ قُلِ ٱللَّهُ ۚ قُلْ أَفَٱتَّخَذْتُم
مِّن دُونِهِۦٓ أَوْلِيَآءَ لَا يَمْلِكُونَ لِأَنفُسِهِمْ نَفْعًا وَلَا ضَرًّا ۚ
قُلْ هَلْ يَسْتَوِى ٱلْأَعْمَىٰ وَٱلْبَصِيرُ أَمْ هَلْ تَسْتَوِى
ٱلظُّلُمَٰتُ وَٱلنُّورُ ۗ أَمْ جَعَلُوا۟ لِلَّهِ شُرَكَآءَ خَلَقُوا۟ كَخَلْقِهِۦ
فَتَشَٰبَهَ ٱلْخَلْقُ عَلَيْهِمْ ۚ قُلِ ٱللَّهُ خَٰلِقُ كُلِّ شَىْءٍ
وَهُوَ ٱلْوَٰحِدُ ٱلْقَهَّٰرُ ﴿١٦﴾

17. wuxuu ka soo dejiyey Samada Biyo waxaana la durduray waadiyo Awooddood wuxuuna xambaartaa daadku daadxoor sarraysa, waxay dabka ku huriyaanna Doonid isku qurxin,

أَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَسَالَتْ أَوْدِيَةٌۢ بِقَدَرِهَا
فَٱحْتَمَلَ ٱلسَّيْلُ زَبَدًا رَّابِيًا ۚ وَمِمَّا يُوقِدُونَ عَلَيْهِ
فِى ٱلنَّارِ ٱبْتِغَآءَ حِلْيَةٍ أَوْ مَتَٰعٍ زَبَدٌ مِّثْلُهُۥ ۚ كَذَٰلِكَ يَضْرِبُ

ama alaabo waxaa ah abuur la mida, saasuuna Eebe ugu yeelan tusaale xaqa iyo Baadilka, Xumbaduse way tagi iyadoo ingagan waxa dadka anficise wuxuu ku nagaan dhulka, saasuuna Eebe u yeelaa Tusaalayaasha.

ٱللَّهُ ٱلۡحَقَّ وَٱلۡبَٰطِلَۚ فَأَمَّا ٱلزَّبَدُ فَيَذۡهَبُ جُفَآءٗۖ
وَأَمَّا مَا يَنفَعُ ٱلنَّاسَ فَيَمۡكُثُ فِي ٱلۡأَرۡضِۚ
كَذَٰلِكَ يَضۡرِبُ ٱللَّهُ ٱلۡأَمۡثَالَ ١٧

Eebe mooyee Ilaah kale ma jiro, Cirka, Dhulka iyo Khalqiga dhammaanna Eebaa ahaysiiyey, mana mudna cid kale in wax lala wadaajiyo, illeen waxba ma hantaane, mana sinna Mu‘min iyo gaal, sidayna u sinnayn indhoole iyo wax arke, iyo Mugdi iyo Iftiin, wax abuura abuurka Eebe oo kalena ma jiro, Eebaase wax kasta abuuray, waana kali awood badan, isagaana roobka keena Togogana durduriya iyagoo xambaarsan xumbo sarreysa, sida xumbada birta, saasuuna Eebe ugu yeelaa Tusaale Xaqa iyo Baadhilka, xumbaduse way tagtaa iyadoo ingagan waxa dadka anficise dhulkuu ku hadhaa, saasuuna Eebe wax u tusaaleeyaa, arrintaasuna waxay ku tusin in Eebe Ilaaha xaqa yahay, inayna sinnayn Mu‘min iyo Gaal, Mugdi iyo Nuur, in Roobka Eebe keeno, in xumaantu baabi‘i xaquna sugnaan, waana tusaale caddeyn sida kala bixi Maalinta Qiyaame iyo Aakharo. «Allaha sahlo». Ar-Racd (16-17).

---

18. kuwa Eebahood ajiibay (Maqlay) waxaa u sugnaaday wanaag (janno) kuwaan ajiibin (maqlinna) hadduu u sugnaado waxa dhulka ku sugan dhammaan oo wax la mida la jiro way isku furan lahaayeen kuwaasna waxaa u sugnaaday xisaab xun (daran) Hooygooduna waa Jahannamo iyadaana u xun gogol.

لِلَّذِينَ ٱسۡتَجَابُواْ لِرَبِّهِمُ ٱلۡحُسۡنَىٰۚ وَٱلَّذِينَ
لَمۡ يَسۡتَجِيبُواْ لَهُۥ لَوۡ أَنَّ لَهُم مَّا فِي ٱلۡأَرۡضِ جَمِيعٗا
وَمِثۡلَهُۥ مَعَهُۥ لَٱفۡتَدَوۡاْ بِهِۦٓۚ أُوْلَٰٓئِكَ لَهُمۡ
سُوٓءُ ٱلۡحِسَابِ وَمَأۡوَىٰهُمۡ جَهَنَّمُۖ وَبِئۡسَ ٱلۡمِهَادُ ١٨

19. cid og in waxa lagaaga soo dejiyey xagga Eebahaa uu xaq yahay ma la midbaa mid indho la‘, waxaa uun waantooma kuwa caqliga leh.

۞أَفَمَن يَعۡلَمُ أَنَّمَآ أُنزِلَ إِلَيۡكَ مِن رَّبِّكَ ٱلۡحَقُّ كَمَنۡ
هُوَ أَعۡمَىٰٓۚ إِنَّمَا يَتَذَكَّرُ أُوْلُواْ ٱلۡأَلۡبَٰبِ ١٩

20. ee ah kuwa Oofiya ballanka Eebe oon burininna ballanka adag.

ٱلَّذِينَ يُوفُونَ بِعَهۡدِ ٱللَّهِ وَلَا يَنقُضُونَ ٱلۡمِيثَٰقَ ٢٠

21. ee ah kuwa xidhiidhiya waxa Eebe faray in la xidhiidhiyo kana cabsada Eebahood kana cabsada xisaab xun.

وَٱلَّذِينَ يَصِلُونَ مَآ أَمَرَ ٱللَّهُ بِهِۦٓ أَن يُوصَلَ
وَيَخۡشَوۡنَ رَبَّهُمۡ وَيَخَافُونَ سُوٓءَ ٱلۡحِسَابِ ٢١

22. ee ah kuwa u samray doonid wajiga Eebahood dartiis, oogayna Salaadda, kana bixiyey waxaan ku arzaaqnay qayb qarsoodi iyo muuqaalba, raacsiiyana wanaagga xumaanta, kuwaas cidhib fiican yaa u sugnaatay.

وَٱلَّذِينَ صَبَرُواْ ٱبۡتِغَآءَ وَجۡهِ رَبِّهِمۡ وَأَقَامُواْ ٱلصَّلَوٰةَ
وَأَنفَقُواْ مِمَّا رَزَقۡنَٰهُمۡ سِرّٗا وَعَلَانِيَةٗ وَيَدۡرَءُونَ
بِٱلۡحَسَنَةِ ٱلسَّيِّئَةَ أُوْلَٰٓئِكَ لَهُمۡ عُقۡبَى ٱلدَّارِ ٢٢

23. waxaana gali jannada cadnin iyaga iyo cidda suuban oo Aabbayaalkooda,Haweenkooda iyo caruurtooda, Malaa‘igtuna waxay uga soo gali irid kasta.

جَنَّٰتُ عَدۡنٖ يَدۡخُلُونَهَا وَمَن صَلَحَ مِنۡ ءَابَآئِهِمۡ وَأَزۡوَٰجِهِمۡ
وَذُرِّيَّٰتِهِمۡۖ وَٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ يَدۡخُلُونَ عَلَيۡهِم مِّن كُلِّ بَابٖ ٢٣

24. iyagoo ku dhihi Nabadgalyo korkiinna ha ahaato samirkiinna dartiis waxaa wanaag badan cidhibta daarta (Janno).

سَلَٰمٌ عَلَيۡكُم بِمَا صَبَرۡتُمۡۚ فَنِعۡمَ عُقۡبَى ٱلدَّارِ ٢٤

Wanaag fale wanaag iyo jannaa u sugnaaday illeen Eebuu maqlaye, kuwaan Eebe maqlinna waxa dhulka ku sugan hadday leeyihiin dhammaan iyo wax la mida way isku furan lahaayeen Qiyaamada waxaana u sugnaaday xisaab xun iyo Hooy cadaab, mana sinna cid og xaqnimada Quraanka iyo cid ka indho la‘waanaduna waxay anfacdaa kuwa caqliga leh ee oofiya cahdiga iyo Ballanka Eebe, ee xidhiidhiya waxa Eebe faray in la xidhiidhiyo oo Qaraabo iyo Dadka dhibaataysan iyo Xaqa Eebe,xisaab xunna ka yaaba, ee samra oo u adkaysta cibaadada dar Eebe, Oogana Salaadda waxna bixiya Qarsoodi iyo muuqba, waana kuwa cidhib fiican iyo Jannada cadnin u sugnaatay iyaga iyo Ehelkooda Wanaagsan, Malaa‘igtuna meel walba way uga soo geli iyadoo salaami uguna bogaadin cidhibta fiican, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Kooxda jannada u hor gali waa fuqarada kuwii dar Eebe u Hijrooday, Ilaaliya xuduudda Islaamka oo xumaanta lagaga dhawrsado isagoo dantiisii Laabta ku haysta wax u gudina jirin.. waxaa wariyey Imaam Axmed. Ar-Racd (18-24).

---

25. kuwa buriya Ballanka Eebe adkayntiisa ka dib gooyana wuxuu faray Eebe in la xidhiidhiyo oo fasaadiyana dhulka kuwaas waxaa u sugnaaday Lacnad iyo Guri xun.

وَٱلَّذِينَ يَنقُضُونَ عَهۡدَ ٱللَّهِ مِنۢ بَعۡدِ مِيثَٰقِهِۦ
وَيَقۡطَعُونَ مَآ أَمَرَ ٱللَّهُ بِهِۦٓ أَن يُوصَلَ وَيُفۡسِدُونَ
فِي ٱلۡأَرۡضِ أُوْلَٰٓئِكَ لَهُمُ ٱللَّعۡنَةُ وَلَهُمۡ سُوٓءُ ٱلدَّارِ ٢٥

26. Eebaana u fidiya rizqiga cidduu doono kuna cidhiidhya (cidduudoono), waxayna ku farxeen gaaladii Nolosha Adduunyo, mana aha nolosha adduunyo Aakharo agteeda waxaan maalmo lagu raaxaysto ahayn

ٱللَّهُ يَبۡسُطُ ٱلرِّزۡقَ لِمَن يَشَآءُ وَيَقۡدِرُۚ وَفَرِحُواْ بِٱلۡحَيَوٰةِ
ٱلدُّنۡيَا وَمَا ٱلۡحَيَوٰةُ ٱلدُّنۡيَا فِي ٱلۡأٓخِرَةِ إِلَّا مَتَٰعٞ ٢٦

27. waxay dhihi kuwii gaaloobay maxaa loogu soo dejin waayey korkiina Aayado Eebihiisa xaggiisa, waxaad dhahdaa Eebe wuu dhumiyaa ciduu doono (oo xaqa diida) wuxuuna u hanuuniyaa xagiisa ciddii u noqota.

وَيَقُولُ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لَوۡلَآ أُنزِلَ عَلَيۡهِ ءَايَةٞ مِّن رَّبِّهِۦۚ
قُلۡ إِنَّ ٱللَّهَ يُضِلُّ مَن يَشَآءُ وَيَهۡدِيٓ إِلَيۡهِ
مَنۡ أَنَابَ ٢٧

28. ee ah kuwa rumeeyey Xaqa kuna xasishay Quluubtoodu xuska Eebe, xuska Eebayna ku xasishaa Quluubtu.

ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَتَطۡمَئِنُّ قُلُوبُهُم بِذِكۡرِ ٱللَّهِۗ
أَلَا بِذِكۡرِ ٱللَّهِ تَطۡمَئِنُّ ٱلۡقُلُوبُ ٢٨

29. ee ah kuwa rumeeyey xaqa falayna camal suuban waxaana u sugnaaday khayr iyo Nicmo iyo Noqosho wanaagsan.

ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ طُوبَىٰ
لَهُمْ وَحُسْنُ مَـَٔابٍ ٢٩

Aayadda hore kuwa ku xusan waa kuwa ka soo horjeeda Mu miniinta ee Buriya ballanka gooyana wuxuu faray in la xidhiidhiyo Eebe, dhulkana fasaadiya oo xumaan iyo gaalnimo iyo dulmi ku maamula, kuwaas lacnad iyo guri xun baana u sugnaaday, Awooddana Eebaa iska leh oo cidduu doonana Imtixaan ugu waasiciya, kuu doona wax kaafiya siiya ama ku cidhiidhya, mana aha jeceyl iyo Nacayb midna, Gaalana waxay ku farxaan adduunyada, Nolosha Adduunyana markii loo eego Aakharo iyo waxa Eebe u darbay Mu‘miniinta waa maalmo raaxo leh ee tegi, waxaana Xadiith ku sugnaaday: adduunyadu markii loo eego Aakharo waa far bad la geliyey, bal ha eego wuxuu ka soo celiyey. wariye «Muslim». Gaalana mucjiso doonid iyo madax adayg waa caadadood, Ciddiise xaqa diida Eebaa sii dhumiya, tii hanuunka doontana wuu hanuuniyaa, ee qalbigeedu ku xasisho xuska Eebe, Xusidda Eebaana Quluubtu ku xasishaa, Kuwaa xaqa rumeeyey ee camal fiican fala waxay heli Janno iyo Noqosho fiican, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabaddgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Jannada waxaa ah geed uu socda kan saaran hooskeed Boqol sano oosan goynayn. Waxaa wariyey Bukhaari. Wakaas xaqa Eebe iyo Awooddiisa, iyo xaalka Adduun iyo kan aakhiro iyo wax qalbigu ku xasilo iyo Janno iyo wanaag iyo hanuun iyo baadi ciddii caqli lehna way kala dooran. Ar-Racd (25-29).

---

30. saasaan kuugu dirray Ummad ay tageen Ummado hortood inaad ku akhrido kaan kuu waxyoonay iyaguna waxay ka gaaloobi Eebaha Raxmaana, waxaad dhahdaa Eebe mooyee Ilaah kale ma jiro, isagaana tala saartay xagiisaana u noqon.

كَذَٰلِكَ أَرْسَلْنَٰكَ فِىٓ أُمَّةٍ قَدْ خَلَتْ مِن قَبْلِهَآ أُمَمٌ
لِّتَتْلُوَا۟ عَلَيْهِمُ ٱلَّذِىٓ أَوْحَيْنَآ إِلَيْكَ وَهُمْ يَكْفُرُونَ
بِٱلرَّحْمَٰنِ ۚ قُلْ هُوَ رَبِّى لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ عَلَيْهِ تَوَكَّلْتُ
وَإِلَيْهِ مَتَابِ ٣٠

31. haddii Quraan dartiis buuro lala kaxayn, ama lala goyn dhulka ama lagula hadli Dadkii dhintay (Wuxuu noqon lahaa Quraankan) amarkase Eebaa dhammaantiis iska leh, miyeyanse ogayn kuwa rumeeyey xaqu hadduu Eebe doono inuu hanuunin lahaa Dadka dhammaan kamana tagaan kuwii gaaloobay (Xumaan) intay kaga dhacdo Musiibo waxay faleen Darteed ama degto meel ku dhaw guryahooda intuu ka yimaaddo Yaboohii Eebe,Ilaah Ma baajiyo ballanka.

وَلَوْ أَنَّ قُرْءَانًا سُيِّرَتْ بِهِ ٱلْجِبَالُ أَوْ قُطِّعَتْ
بِهِ ٱلْأَرْضُ أَوْ كُلِّمَ بِهِ ٱلْمَوْتَىٰ ۗ بَل لِّلَّهِ ٱلْأَمْرُ جَمِيعًا ۗ
أَفَلَمْ يَا۟يْـَٔسِ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ أَن لَّوْ يَشَآءُ ٱللَّهُ لَهَدَى
ٱلنَّاسَ جَمِيعًا ۗ وَلَا يَزَالُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ تُصِيبُهُم
بِمَا صَنَعُوا۟ قَارِعَةٌ أَوْ تَحُلُّ قَرِيبًا مِّن دَارِهِمْ حَتَّىٰ يَأْتِىَ
وَعْدُ ٱللَّهِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُخْلِفُ ٱلْمِيعَادَ ٣١

32. waxaa lagu Jees Jeesay Rasuullo kaa horreeyey markaasaan sugay kuwii gaaloobay, ka dibna waan Qabtay ee

وَلَقَدِ ٱسْتُهْزِئَ بِرُسُلٍ مِّن قَبْلِكَ فَأَمْلَيْتُ لِلَّذِينَ

siday noqotay ciqaabtaydii (Way dar-rayd).

كَفَرُوا۟ ثُمَّ أَخَذْتُهُمْ ۖ فَكَيْفَ كَانَ عِقَابِ ﴿٣٢﴾

Eebe wuxuu sheegay Nabiga Inuu u diray ummad ay ka horreeyeen ummado Rasuullo loo diray, si aad ugu akhrido waxa laguu waxyooday,waxayna ka gaaloobi Eebaha Raxmaan,waxaad dhahdaa waa Eebahay, Ilaahay mooyee Eebe kalana ma jiro, isagaanan talo saartay Xaggiisaana u noqon, u toobad keeni, Eebana isagoo amaani quraanka wuxuu sheegay in haddii Kutubihii hore laga heli Kitaab Buuraha meejooda ka kaxeeya ama dhulka lala Gooyo, ama dadkii dhintay lagula hadlo waxaa ka mudnaan lahaa Quraankan, Amarka Eebaa dhammaantiis iska leh, miyeynase ogayn kuwii rumeeyey in hadduu Eebe doono hanuunin lahaa Dadka dhammaan, Gaalana kama tagaan xumaanta inta kaga dhacdo Musiibo, ama ay ku dhacdo meeja u dhaw Guryahooda intuu ka yimaado yaboohii Eebe oo ah guusha Islaamka, ama Qiyaamada, Eebana ma baajiyo ballanka. Waxaa lagu jees jeesay Rasuullo kaa horreeyey waxaana u sugay gaaladii markaasaan qabtay ee siday tahay ciqaabtaydii. Aayaduhuna waxay caddayn Rasuulnimada Nabiga, Kalinimada Eebe, Talasaarashadiisa, in isaga loo noqon, fadliga iyo Sharafta Quraanka, Madax adaygga Gaalada, in la ciqaabi Eebana oofin ballanka. Ar-Racd (30-32).

---

33. cid ku ilaalin naf kastaa waxay kasbatay (Eebe) ma la midbaa midaan saas ahayn, waxayna u yeeleen Eebe Shurako dheh magacaaba, mise waxaad Eebe uga warramaysaan waxaan joogin Dhulka, mise hadal muuqaala, saas ma aha ee waxaa loo qurxiyey kuwii gaaloobay dhagartooda waxaana laga leexiyey Jidka, cid Eebe dhumiyeyna ma laha wax hanuunin.

أَفَمَنْ هُوَ قَآئِمٌ عَلَىٰ كُلِّ نَفْسٍۭ بِمَا كَسَبَتْ ۗ وَجَعَلُوا۟
لِلَّهِ شُرَكَآءَ قُلْ سَمُّوهُمْ ۚ أَمْ تُنَبِّـُٔونَهُۥ بِمَا لَا يَعْلَمُ
فِى ٱلْأَرْضِ أَم بِظَٰهِرٍ مِّنَ ٱلْقَوْلِ ۗ بَلْ زُيِّنَ لِلَّذِينَ
كَفَرُوا۟ مَكْرُهُمْ وَصُدُّوا۟ عَنِ ٱلسَّبِيلِ ۗ
وَمَن يُضْلِلِ ٱللَّهُ فَمَا لَهُۥ مِنْ هَادٍ ﴿٣٣﴾

34. waxayna mudan cadaab nolosha adduun,cadaabka aakhiraana daran mana u sugna wax Eebe ka Ilaalin.

لَّهُمْ عَذَابٌ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا ۖ وَلَعَذَابُ ٱلْـَٔاخِرَةِ أَشَقُّ ۖ
وَمَا لَهُم مِّنَ ٱللَّهِ مِن وَاقٍ ﴿٣٤﴾

35. tusaalaha (Tilmaanta) jannada loo darbay kuwa dhawrsada waa inay dhex socdaan Wabiyaalkii, Cunnadeeduna waa joogto iyo hooskeedu, taasina waa cidhibta kuwa dhawrsada cidhibta gaaladuna waa Naar.

۞ مَّثَلُ ٱلْجَنَّةِ ٱلَّتِى وُعِدَ ٱلْمُتَّقُونَ ۖ تَجْرِى
مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ ۖ أُكُلُهَا دَآئِمٌ وَظِلُّهَا ۚ تِلْكَ
عُقْبَى ٱلَّذِينَ ٱتَّقَوا۟ ۖ وَّعُقْبَى ٱلْكَٰفِرِينَ ٱلنَّارُ ﴿٣٥﴾

Eebaa wax walba ilaaliya oo daalacan, wax la midana ma jiro, iyo wax ku dhaw midna, Shurakada ay u yeeleenna waa been ay magacaabeen oon joogin Dhulka iyo war muuqaalkiis, mase Eebay uga warrami Khalqigiisa kuwaas wuxuu shaydaan u qurxiyey dhagartooda, jidka Xaqa ahna waa laga awday, wax toosinna ma helaan, waxayna mudan Cadaab adduun iyo mid ka daran oo Aakhiro, wax Eebe ka dhawrina ma jiro, Jannada loo darbay Mu‘miniinta dhawrsatana waa in Wabiyaal dhex socdaan Cunnadeeda iyo hooskeeduna Joogto yahay, waana cidhibta kuwa dhawrsada, sida Naartu u tahay cidhibta Gaalada. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wax badan yuu fasiray Aayadaha Jannada ka warrami oo tilmaamay inay Nicmo ku dhantahay, xumaanna ka fogtahay, lagana dhimanayn, dhib iyo rafaadna lahayn, ciddii caqli lehna waa inay u darbato, una guuro, una galab caraabo, una kallaho cid guurtayna way gaadhaa Maqsadkeeda, haddiise lagu khaldamo dhalanteed iyo bildhaanta Adduun waa uun khasaare iyo halaag . « Eebe ha na toosiyo». Ar-Racd (33-35).

36. kuwaan siinnay Kitaabka waxay ku farxaan waxa lagugu soo dejiyey, xisbiyada waxaa ka mida kuwo diidi Qaarkiis, waxaad dhahdaa waxaa uun lay faray inaan caabudo Eebe una shariig yeelin, xaggiisaan u yeedhi xaggiisaana u noqon.

وَٱلَّذِينَ ءَاتَيْنَٰهُمُ ٱلْكِتَٰبَ يَفْرَحُونَ بِمَآ أُنزِلَ
إِلَيْكَ ۖ وَمِنَ ٱلْأَحْزَابِ مَن يُنكِرُ بَعْضَهُۥ ۚ قُلْ إِنَّمَآ
أُمِرْتُ أَنْ أَعْبُدَ ٱللَّهَ وَلَآ أُشْرِكَ بِهِۦٓ ۚ إِلَيْهِ أَدْعُوا۟
وَإِلَيْهِ مَـَٔابِ ﴿٣٦﴾

37. saasaana kuugu soo dejinnay xukun Carabi ah, haddaad raacdo hawadoodana intuu cilmi ku soo gaadhay ka dib, kama helaysid xagga Eebe gargaare iyo dhawre.

وَكَذَٰلِكَ أَنزَلْنَٰهُ حُكْمًا عَرَبِيًّا ۚ وَلَئِنِ ٱتَّبَعْتَ
أَهْوَآءَهُم بَعْدَ مَا جَآءَكَ مِنَ ٱلْعِلْمِ مَا لَكَ مِنَ ٱللَّهِ
مِن وَلِىٍّ وَلَا وَاقٍ ﴿٣٧﴾

38. waxaan dirray hortaa rasuullo waxaana u yeellay Haween iyo caruur, Rasuulna Mucjiso lama imaan karo idimka Eebe La‘aantiis, muddo kastana way Qorantahay.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا رُسُلًا مِّن قَبْلِكَ وَجَعَلْنَا لَهُمْ أَزْوَٰجًا
وَذُرِّيَّةً ۚ وَمَا كَانَ لِرَسُولٍ أَن يَأْتِىَ بِـَٔايَةٍ
إِلَّا بِإِذْنِ ٱللَّهِ ۗ لِكُلِّ أَجَلٍ كِتَابٌ ﴿٣٨﴾

39. Eebana wuu tiraa wuxuu doono wuuna sugaa, Agtiisana waxaa ah Looxul maxfuudka.

يَمْحُوا۟ ٱللَّهُ مَا يَشَآءُ وَيُثْبِتُ ۖ وَعِندَهُۥٓ
أُمُّ ٱلْكِتَٰبِ ﴿٣٩﴾

Kuwii Ehelu Kitaabka ahaa Qaarkooda rumeeyey Nabiga iyo Xaquu la yimid way ku farxayeen, inkastoo koox ka mida ay diidi xaqa Qaarkiis, Nabigana waxaa la faray inuu Eebihiis uun Caabudo xaggiisana ugu yeedho Dadka illeen xaggiisaa loo noqone, saasaana loogu soo dejiyey Quraan Carabi ah, ciddii raacda hawo dad oo xun iyagoo u cilmi leh kama helayo xagga Eebe gargaare iyo ilaaliye midna. Inuu Eebe diro Rasuulna waa Jid Eebe oo horreeyey waxayna yeesheen Xaas iyo caruur, illeen waa Bani Aadame, Rasuul Mucjiso la imaan karana ma jiro idimka Eebe la‘aantiis, wax kastana waqti go‘an yuu leeyahay, wuxuu rabana Eebe wuu tiraa, wuxuu doonana wuu sugaa, Agtiisana waxaa ah Looxul maxfuudka.
Taasina waxay ku tusin in ciddii Cilmi iyo Caqli leh ay rumayn Nabiga iyo Quraanka, iyo in Eebe kaliya la caabudo, looguna yeedho dadka, ciddii xaqa ka leexata ayan gargaare heleyn, in Rasuulladu dad yihiin oy wax cuni waxna guursan waxna dhalaan, in Mucjisadu xagga Eebe ka timaaddo, in wax walba muddo leeyahay, in Eebe wuxuu doono tiro kuu doonana sugo. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Ruuxa waxaa Rizqiga looga Hoojiyaa Dambi dartiis, Ducaduna Qaddarkay wax ka tartaa, Cimrigana waxaa siyaadiya samo fal. waxaa wariyey Axmed,Nasaai iyo kuwo kale. Ar-Racd (36-39).

---

40. haddaan ku tusinno qaar waxaan u yaboohi (oo dulli ah waa saas) haddaanse ku Oofsanno waxaa uun korkaaga ah Gaadhsiin Anagana waxaa na saaran inaan xisaabinno.

وَإِن مَّا نُرِيَنَّكَ بَعْضَ ٱلَّذِى نَعِدُهُمْ أَوْ نَتَوَفَّيَنَّكَ
فَإِنَّمَا عَلَيْكَ ٱلْبَلَٰغُ وَعَلَيْنَا ٱلْحِسَابُ ﴿٤٠﴾

41. miyeyna arkayn inaannu uga imaan dhulka darfaha anagoo nusqaamin furid (ama Abaar) Eebana wuu

أَوَلَمْ يَرَوْا۟ أَنَّا نَأْتِى ٱلْأَرْضَ نَنقُصُهَا مِنْ أَطْرَافِهَا ۚ وَٱللَّهُ

xukumi, wax burinna ma jiro xukunkiisa, waana midkay deg deg tahay xisaabtiisu.

يَحۡكُمُ لَا مُعَقِّبَ لِحُكۡمِهِۦۚ وَهُوَ سَرِيعُ
ٱلۡحِسَابِ ٤١

42. waxaa wax dhagray kuwii ka horreeyey Eebaase abaal maris (Dhagar) iska leh dhammaan, wuxuuna ogyahay waxay kasban naf kasto, waxayna ogaan Gaaladu cidday u ahaato cidhib fiican.

وَقَدۡ مَكَرَ ٱلَّذِينَ مِن قَبۡلِهِمۡ فَلِلَّهِ ٱلۡمَكۡرُ جَمِيعٗاۖ
يَعۡلَمُ مَا تَكۡسِبُ كُلُّ نَفۡسٖۗ وَسَيَعۡلَمُ ٱلۡكُفَّٰرُ
لِمَنۡ عُقۡبَى ٱلدَّارِ ٤٢

43. waxayna dhihi kuwii Gaaloobay ma tihid Rasuul, waxaad dhahdaa waxaa marag ugu filan dhexdeenna Eebe iyo cidda agteed ogaanshaha Kitaabku yahay.

وَيَقُولُ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لَسۡتَ مُرۡسَلٗاۚ قُلۡ
كَفَىٰ بِٱللَّهِ شَهِيدَۢا بَيۡنِي وَبَيۡنَكُمۡ
وَمَنۡ عِندَهُۥ عِلۡمُ ٱلۡكِتَٰبِ ٤٣

**(Nabiga Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) dhib ma saarra hadduu Eebe Ciqaabo Gaalada intuu Nabigu Noolyahayna waa wanaag, hadduu ka hor Oofsadana waxaa uun Nabiga Saaran Gaadhsiin, Eebana Xisaabtooda, Wuuna u gargaaray Eebe Rasuulkiisa, Gaaladiina jabiyey isagoo Nool, waxaana u muuqatay in Dhulka Darfaha laga soo Nusqaaminayey oo Islaamku ka adkaanayey Gaalnimada, Xukunkana Eebaa iska leh, wax xukunkiisa ka daba hadli karana ma jiro, xisaabtiisuna way deg degtaa, dhagarna waa shaqada Gaalada ama ha horreeyeen ama ha dambeeyeene, Eebaase dhammaan abaal marin iska leh oo ka jaasiin, Gaalana mar umbay ogaan cidda cidhibta fiican u hadho, waxayba ku af adeygeen inay Nabiga Beeniyaan kuna dhahaan ma tihid Rasuul, maxaase looga baahanyahay maraggooda, waxaa marag ugu filan Eebihiis iyo ciddii Cilmi leh oo rumeysan Nabiga oo Ehelu Kitaabkii ah.**
**Suuradduna waxay ku dhamaatay Dhagarta gaalada xumideeda, in xaqu sarreyn, in cidhib fiican Muslimiintu heli, in Rasuullada Eebe soo diray maragna ugu filanyahay. Ar- Racd (40-43).**

## Suurat Ibraahiim سُورَةُ إِبۡرَٰهِيمَ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. xarfaha hore oo kale waa la soo sheegay macnahooda, kanna waa Kitaab aannu kugu soo dejinnay inaad kaga bixisid dadka mugdiyada xagga Nuur idamka Eebehood iyo jidka Eebaha adkaada ee la Mahadiyo.

الٓرۚ كِتَٰبٌ أَنزَلۡنَٰهُ إِلَيۡكَ لِتُخۡرِجَ ٱلنَّاسَ
مِنَ ٱلظُّلُمَٰتِ إِلَى ٱلنُّورِ بِإِذۡنِ رَبِّهِمۡ إِلَىٰ صِرَٰطِ
ٱلۡعَزِيزِ ٱلۡحَمِيدِ ١

2. Ilaaha iska leh waxa Samooyinka iyo Dhulka ku sugan, halaagna waxaa mudan Gaalada cadaab daran xaggiis.

ٱللَّهِ ٱلَّذِي لَهُۥ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِۗ
وَوَيۡلٞ لِّلۡكَٰفِرِينَ مِنۡ عَذَابٖ شَدِيدٍ ٢